

Miyey ku haysataa dhibaato xagga Alkolada ahi? Maxay ma aniga?

**Waa xaqiiqo jirta inay had iyo goor dadka
qabatimay cabitaanka Alkoladu yihiin QOFKA UGU
DAMBEEYA ee ogolaada ama xaqiiqsada inay
dhibaato haysato!**

Ka fiirso kuwan:

- Miyaad aad ugu baahataa in aad cabto?
- Miyey kugu adkaataa in aad joojiso mar haddii aad cabitaankiisa bilowdo?
- Miyaad si qarsoodi ah u cabtaa? Miyaad keligaa cabtaa?
- Miyaad cabitaanadaada isku dhex dartaa?
- Miyaad subixii salaada hore cabtaa?
- Miyaad gariirtaa'?
- Miyaad cabtaa intaad cabi karaysay wax ka badan markay saaxiibadaa ama dad qaraabadaada ahi ay kugu khasbaan inaad cabto?
- Ma ku fekertaa sheekooyin cabitaanka ah markaad aad u sakhraanto'?
- Ma dareentaa inaad dembiile tahay xagga cabitaanka?
- Miyey dagaalo idin dhexmaraan adiga iyo xubnaha kale ee qoyskaaga?
- AMA qaraabadaada, saaxiibadaa, dadka aad jeceshahay ama dadka aad la shaqayso?
- Haddii aad shaqayso, miyaad si joogto ah uga maqnaataa shaqada ama miyey shaqadaada dhibaato kasoo gaadhaa? Miyey ku haystaan dhibaatooyin xagga lacagta ah ama dhibaatooyin kale?
- Miyaad bugtaa? Indho darraysay? Hadalkaagii kadh kadh yeeshay? Isku buuqday? Abateetkii kaa lumay? Cadhadaadii badatay? Ama wax ka sii daran?

**Haddii mid ka mid ah ama dhammaan waxyaabaha
sare ay ku khuseeyaan markaas
WAXA LAGA YAABAA INAAD QABATINTAY
CABITAANKA AALKOLADA**

**Qabatinka cabitaanka Alkoladu waxay burburisaa sharafta
iyo qoysaska iyo weliba caafimaadka jidhka, maanka iyo
caadifadda.**

**Anaga nala hadal Barnaamijka Waxka qabadka
Maandooriyaha iyo Alkolada.
Waanu kaa caawin doonaa dhibaatooyinkaaga iyo
qabatinkaaga.**

nagala soo hadal telifoonka 0208 843 0945

Qabatinka Alkolada

Waxa jira jawaabo badan oo ku saabsan su'aasha ah sababta ay dadku wax badan u cabaan? Dadka qaarkood ayaa in badan ka caba alkolada sababta oo ah iyagoo aan wehel haysan ama baro kacay ama ay haystaan dhibaatooyin xagga aqoonsiga ama shakhsiba ahi. Qaarkood ayaa iyana u caba iyagoo cid kale ku dayanaya. Qaarna sababta oo ah iyaga oo jidh ahaan iyo maskax ahaanba ku tiirsan aalkolada.

Arrinta muhiimka ahi waa in la aqoonsado oo la ogaado dhibaata ay qabatinka alkoladu u geysato qofka, qoysaskooda iyo beeshooda.


Waa sheeko iska khiyaali ah in qofka qabatimay cabitaanka alkolada la daaweyn karo haddii meel lagu xidho oo laga ilaaliyo alkolada.

Dadka doonaya in laga caawiyo qabatinka cabitaanka alkolada waxay u baahanyihiin taageero badan oo ay ka mid tahay in laga joojiyo iyo dhaqan celin loo marinayo waxbarasho, la talin, barnaamijyada habboon, shaqo kooxeed 1:1 ah, xubnaha qoyska iyo dadka jecelina waxay iyana u baahanyihiin taageero si ay u maareeyaan saamaynta ay ku yeelatay qabatinka cabitaanka alkoladu.

Nagala soo xidhiidh anaga oo ah Barnaamijka Wax ka Qabadka Maandooriyaha iyo Alkolada talo qarsoodi ah iyo wixii macluumaad ah ee ku saabsan adeegyada taageerada ee xaafadda Ealing

Telifoonka ah 0208 843 0945

KAANTAROL – TANI WAA NOLOSHAADIYE



Dadka Biritishka ah ee cabbaa waxay ku kharash gareeyaan alkolada lacag dhan **£30bilyan** sannad walba. **£1.7bilyan** ayaa lagu kharash gareeyaa daaweynta xanuunada la xidhiidha alkolada. Cabitaanka xad dhaafka ahi wuxuu dalka kharash gareeyaa **£20 bilyan sannadkii.17 milyan oo maalmihii shaqada ah** ayaa ku luma qaadiro iyo xanuuno cabitaanka la xidhiidha sannad kasta. Dembiyada la xidhiidha alkoladu waxay ku kacaan lacag dhan **£7.3bilyan. £4.7bilyan** ayaa lagu kharash gareeyaa kharashyada xagga aadaminimada iyo caadifadda ee dembiyada la xidhiidha alkolada ee ay ka midka yihiin qalalaasaha guriga iyo galmadu. Sannad walba waxa dhaca **1.2 milyan oo dhacdooyin** dagaal ah oo la xidhiidha alkolada. Illaa iyo **1.3 milyan oo carruur ah** ayay saamaysaa waalidiinta leh dhibaatooyin xagga cabitaanka ah.